Sarahh Edwards: Mar labaad waan salaamay qof kasta. Waxaan ahay Sarah Edwards, waxaanan ahay agaasimaha Tababarka Carewell SEIU 503.

Whitney Taylor: Ana waxaan ahay Whitney Taylor, maamulaha horumarinta manhajka ee Tababarka Carewell. Waa farxad in aanu halkan joogno.

Cheryl Miller: Waad mahadsan tihiin labadiinuba. Ilaa iyo hadda, waxaanu ka hadalnay shuruudaha tababarka iyo halka uu ka yimid, waxa ay shuruudahan cusubi ula egyihiin shaqaalaha cusub iyo sida ay u saameynayaan shaqaalaha hadda jira, waxaanan bixinay macluumaadka qaarkiis oo ku saabsan shuruuda sii wadashada waxbarashada. Maanta, waxaanu soo gabagabeynaynaa taxaneena shan qaybood ah iyada oo aan isha marinayno qaar ka mid ah su'aalaha inta la badan la isweydiiyo ee aanu helno. Maadaama aanu waxyaabahani inta badan kaga hadalay intii lagu jiray taxanaheena, waxaanu dareenay in ay muhiim ahayd in si toos ah looga hadlo su'aalaha ugu badan. Su'aasha u horreysa ee aanu rabna in aanu ka hadalno waxay noqon kartaa su'aasha ugu badan ee aanu helno. Waa maxay sababta shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed, iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed ee sanadaha badan soo shaqeynayay looga baahan yahay in ay qaataan tababarkani?

Whitney Taylor: Haa, taasi waa su'aal caam ah. Markaa, tababarku wuxuu faa'iido u yahay daryeel bixiyayaasha iyo dadka ay taageerayaan iyada oo la xaqiijinayo in daryeel bixiyayaashu ay haysaan dhammaan macluumaadka ay u baahan yihiin si ay si badbaado leh ugu bixiyaan adeegyo tayo leh iyo in ay wax ka ogaadaan hababka ugu fiican ee wax loo qabto ee hadda jira. Wareegan bilowga ah ee tababarka wuxuu gacan ka geysan doonaa in la abuuro aasaaska aqoonta oo ku xeeran heerarka daryeelka ee qof walba oo ku nool Oregon. Kuwii muddada dheer ku jiray xooga shaqaalaha ayay u badan tahay in ay aqoon u leeyihiin fikradaha badan ee la soo bandhigay; si kastaba ha ahaatee, sida aan dhammaanteen garanayno, faahfaahintu si fudud ayay uga bixi kartaa maskaxdeena, tanina waxay gacan ka geysan doontaa xoojinta waxayna dadka xasuusin doontaa waxyaabo gaar ah oo khuseeya shaqadooda iyo xeerarka ku xeeran. Taxanahani waa mid si ula kac ah loogu yeero dib u eegista taxanaha tababar. Sababtoo ah waxaanu aqoonsanahay qiimaha khibradeed ee ay daryeel bixiyayaashu leeyihiin, qaybta labaad ee taxanahani, dib u eegida aqoon isweydaarsiga dhanka internet-ka ah 'webinar', waa nidaam isku xiran oo dhanka internet-ka ah oo bixiya fursado ay asaagood kula wadaagaan aqoontooda iyo khibradooda. Waxaan u maleynayaa in ay aad muhiim u tahay in la awoodo wadaagista khibradaha, fikrad lala yimaado, oo la aqoonsado in kuwo kale oo badani leeyiiin caqabado isku mid ah oo ay dhici karto in ay isticmaaleen xalal aydaan haddii kale ka fikirin. Waxaa jira qiimo aad u badan dhanka tababarka xataa marka arrinta laga hadlayo la yaqaano.

Cheryl Miller: Markaa, su'aal kale oo dadku inta badan weydiiyaan waa miyay dadka u shaqeeya qoysku tahay in ay qaataan tababarka?

Sarah Edwards: Haa, taasi waa su'aal wanaagsan. Jawaabtuna waa haa. Markaa, tababarka waxaa looga baahan yahay dhammaan shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed xataa

haddii ay kaliya u shaqeynayaan xubinka tirsan qoys. Laakiin, sida ay Whitney hadda uun xustay, tababarka runtii wuxuu faa'iido u leeyahay qofka bixinaya daryeelka si loo xaqiijiyo in uu haysto macluumaadka ugu fiican uguna cusub ee hadda jira marka uu daryeelayo qof ay isku dhow yihiin. Waanan aqoonsahay in aad si fiican u taqaan xubinta ka tirsan qoyskaaga, waxaanu sidoo kale aqoonsahay in ay jiraan siyaabo badan oo bixinta daryeelka loogu talagalay xubnaha ka tirsan qoysku uu runtii u noqon karo mid adag. Waxaa jira xeerar badan oo la raaco, markaa ka soo qayb galida koorsooyinkani tababar waxay bixinaysaa waxyaabo dheeraad ah iyo loogu talagalay bixinta daryeelka ugu fiican oo la siiyo xubinta ka tirsan qoyskaaga.

Whitney Taylor: Waa hadal wanaagsan, Sarah. Cheryl, waxoogaa yar ayaan hadalka wax beddelayaa. Su'aashan uu dambeysa ee ku saabsan cidda laga rabo in ay qaadato tababarka adiga ayaa iska leh. Miyay dadka adeega ka hela shaqaale tahay in ay qaataan tababarka, sidoo kale?

Cheryl Miller: Su'aal wanaagsan. Maya, ma jiro tababar looga baahan yahay iyaga, laakiin waxaa dhici karta in ay daneynayaan Barnaamijka Isku xirka Ilaha Cida Loo Shaqeeyo ee ay leedahay Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon ee loogu talagalay in uu dadka caawiyo in ay noqdaan cid loo shaqeeyo oo guulaysata ee ah shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed, ama shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed. Aynu wax yar hab cusub u fikirno. Shaqaaluhu waxay badanaa way ka walwalaan in 12 saacadood u egyihiin waqti badan si ay u waafajiyaan jadwaladooda mashquulka ah. Maxaa dhacaya haddii shaqaale uusan haysan waqti uu kaga qayb galo tababarka?

Sarah Edwards: Markaa taasi waa walaac sax ah, iyada oo Carewell ay fahamsan tahay sida ay muhiimka u tahay in tababarku noqdo mid ku habboon, markaa kulamada waxaa loo bixiyaa siyaabo kala duwan. Koorsooyinka dhanka internet-ka waxaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, 7 maalmood toddobaadkii. Daryeel bixiyayaashu way bilaabi karaan oo joojin karaan tababarka dhanka internet-ka waqti kasta oo ay rabaan in ay ka sii qaadaan halkii ay kaga tageen, iyada oo saddex meelood labba ka mid ah tababarku yahay mid qofka waqtigiisa ku xiran 'self-paced'. Iyada oo loogu talagalay qaybta dhacda wakhti go'an, aqoon isweydaarsiga dhanka internet-ka 'webinars', waxay bixiyaan waqtiyo iyo taariikho kala duwan oo ay ku jiraan galabtii iyo toddobaadyada dhammaadkooda, iyada oo daryeel bixiyayaashu ay hadda ka qayb qaadan karaan barnaamijka tijaabada ah oo ay heli karaan credit-ka dhanka tababarka ah marka uu noqdo mid la iskaga baahan yahay Sibtambar 2021. Shaqaalaha hadda jiraa waxay haystaan ilaa Maarso 31, 2022 in ay ku dhammeystaan dib u eegista tababarka, kaasi oo macnihiisu yahay haddii aad hadda bilowdo, waxaad haysataa waqti badan oo ku hesho kulan adiga kuu shaqeeya.

Cheryl Miller: Kaasi waa war wanaagsan. Shaqaalaha hadda jiraa waxay leeyihiin waqti dheer oo ay kaga faa'iideystaan dib u eegista tababarka. Waan ku faraxsanahay tani. Waxay u saamaxaysaa in ay tababarka waafajiyaan jadwalkooda. Su'aal kale oo aanu helno waa sababta oo ah iyada oo tani la iskaga baahan yahay, miyay taasi ka dhigan tahay in shaqaaluhu qaadan karaan tababarka inta lagu jiro saacadaha shaqada?

Sarah Edwards: Maya, tababarka waa in la qaataa marka aad shaqada ka maqan tahay.

Cheryl Miller: Markaa, haddii shaqaale ay runtii ku adag tahay in uu helo waqti oo uusan ku dhammeytirin tababarka la iskaga baahan yahay muddo aan ka dambeyn Maarso 2022, maxaa dhici doona?

Sarah Edwards: Waa hagaag, Sharciga Senate-ka 1534 ayaa shaqaalaha oo dhan uga baahan in ay ka qayb qaataan tababarkani markaa taasi waxay ka dhigan tahay haddii shaqaale uusan qaadan tababar, uma qalmi doono in uu shaqeeyo. Waxaanu runtii rabnaa in shaqaaluhu noqdaan kuwo guuleystay, waxaanan rabnaa in aanu xaqiijino in ay haystaan waqti fara badan oo ay ku qaataan tababarka isla markaana ka caawiyo in ay xalliyaan wixii caqabado ee iyaga ku adkaynaya in ay sidaasi sameeyaan taasina waa sababta tababarkan loo bixiyo waqtiyo dabacsan iyo siyaabo kala duwan, waxaanan sidoo kale bixinaynaa siyaabo kala duwan oo badan oo lagu taageero dadka dhibaatadu ka haysato sameynta waqti ama helitaanka tababar markaa waxay kaliya tahay in ay nala soo xiriiraan anaga, waxaanu runtii ku kalsoonahay in qof kastaa yeelan doono fursad uu uga qayb qaato tababarka.

Cheryl Miller: Waxaad dhowr jeer xustay tababar badan oo lagu bixiyo dhanka internet-ka. Maxaa dhacaya haddii uusan shaqaaluhu haysan ilaha tiknoolajiyadeed si uu u qaato tababarka?

Sarah Edwards: Su’aal wanaagsan. Markaa, tababarka ma aha in la galo iyada oo la adeegsanayo kambiyuutar. Waxaa la qaadan karaa iyada oo la adeegsanayo tablet-ka ama telefoonka gacanta oo casri ah. Intaasi waxaa dheer, waxaan bixinaa siyaabo kale oo lagu qaato tababarada loogu talagalay kuwa aan haysan kambiyuutar ama aan lahayn internet. Waxaanu haynaa xalal kala duwan oo badan oo aanu siin karno dadka, markaa haddii aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah, waxa kaliya ee ay tahay in aad sameyso waa in aad nala soo xiriirto, waxaanan nagula soo xiriiri kartaa telefoon ahaan 1-844-503-7348.

Cheryl Miller: Taasi waa wax aad u fiican in wax laga ogaado dhammaan kala doorashooyinka tiknoolajiyada kala duwan iyo ilaha shaqaaluhu haystaan si ay u helaan tababarka. Dadka doorbiyada in ay tababarka ku qaataan luqad aan ahayn Ingiriisi, ma la heli karaa turjubaano iyo waxyaabo la turjumay?

Whitney Taylor: Haa. Carewell waxay bixisaa adeegyada turjubaanka iyo waxyaabo lagu turjumay luqaddo kala duwan. Waxaad dooran kartaa luqadda aad doorbidayso marka aad gasho nidaamka barashada kaasina wuxuu bandhigi doona tilmaamo la raacayo iyo qaabab wax hagaya oo ku qoran luqadda la doortay. Waxaan hadda haynaa koorsooyinkeena dhanka internet-ka oo si buuxda loogu turjumay lix luqaddood oo kala duwan. Luqadahaasi waxay kala yihiin Isbaanish, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Vietnamese, Arabic, iyo Soomaali. Haddii aad jeclaan lahayd turjumaan loogu talagalay qaybta dhanka internet-ka ee tababarka, waxaad jadwal ka sameynsan kartaa

adigaa oo la xiriiraya 1-844-503-7348. Cheryl, waxaan kuu hayaa su’aal kale. Miyay shaqaalaha qaata tababarada iyaga oo adeegsanaya Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon weli tahay in ay qaataan iyaga oo adeegsanaya Carewell?

Cheryl Miller: Guddiga iyo Carewell waxay leeyahay hadaf isku mid ah oo ah bixinta tababaro tayo leh oo la siiyo shaqaalaha si looga caawiyo horumarinta xirfadahooda. Carewell waxay bixisaa tababarka la iskaga baahan yahay. Guddigu waxay bixisaa tababaro ikhtiyaari ah oo shaqaalaha ka caawiya in ay helaan shahaadooyin xirfadeed sida horumarinta xirfadeed, PDC, shahaadooyinka aqoonsi ee la xoojiyay ee gaarka ah ee loogu talagalay daryeelka guriga iyo shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed, iyo shahaadada ku tiirsanaanta daryeelka neefsashada ee dhaawaca laf-dhabarta ‘quadriplegia’, taasi oo loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga, iyo, dabcan, dhammaan shaqaalaha in ay barnaamijka shaqaalaha caafimaadka dhaqan ahaaneed heli karaan oo uu aqoonsi yahay. Shaqaalaha hadda jira ee haysta mid ka mid ah shahaadooyinkan waa laga dhaafi doonaa dib u eegista taxanaha tababar. Waxaanu ku dhiirigelinaynaa shaqaalaha in ay qaataan iyaga oo adeegsanaya Carewell iyo guddiga. Su’aasha u dambeysa. Miyay tahay in shaqaaluhu bixiyaan lacagta tababarka?

Sarah Edwards: Maya, tababarku waa mid lacag la’aan u ah dhammaan shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed, iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed, kaliya ma ahan lacag la’aan ee waxaa la bixin doonaa lacagta lagu helo tababarka ‘stipend’ marka ay ka soo qayb galaan tababaradeena la iskaga baahan yahay, tilmaan yar, jihayntu ‘orientation’ waa koorso la qaato ka hor shaqaaleysiinta sidaa darteed shaqaaluhu ma heli doonaan lacagta lagu helo tababarka ‘stipend’ oo loogu talagalay taasi, laakiin dhammaan koorsooyinka kale, shaqaalaha waxaa la siin doonaa lacagta lagu helo tababarka ‘stipend’.

Cheryl Miller: Waad mahadsan tahay, Sarah. Waa hagaag, taasi waxay soo dhammeystiraysaa taxane shan qaybood ah oo ku saabsan shuruudaha tababarka ee cusub ee loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed, iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed. Waanu ku faraxsanahay in aad nagu soo biirtay, waxaanan rajeynaynaa in macluumaadka uu ahaa mid waxtar kuu leh. Waanu sii wadi doonaa in aan wadaagno macluumaadka ku saabsan tababarka la iskaga baahan yahay iyada oo la adeegsanayo warbaahinta bulshada, macluumaad la soo gelinayo website-yadeena, la adeegsanayo email, waxaanad xusuusnaataa in aad booqato website-yada Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon iyo Carewell wixii macluumaad dheeraad ah. Waad ku mahadsan tahay in aad maanta naguu soo biirto, Sarah iyo Whitney, waad mahadsan tihiin.

Whitney Taylor: Waad ku mahad tihiin in aad na martiqaadaan.